



Dib u noqosho oo Aljeriya

[Terugkeer naar Algerije]

Ma ku fekertaa in aad waddanka aad ka timid dib ugu noqoto? VluchtelingenWerk tasi wa ay kugu hagi karaan, si aad xulasho wacan u sameyn karto ee ayaatiinkaada.

Ururro kala duwan oo Nederland ku sugan ayaa ka geysta caawinaad dib u noqoshada. Hey'adda U Adeegta Qaxaatiga (VluchtelingenWerk) ma ku laha Aljeriya lamaane. Waxaa malaha macquul ah in aad dib u noqon karto adiga oo adeegsanaayo ururro kale. Hey'adda U Adeegta Qaxaatiga (VluchtelingenWerk) waxa ay kula xiriirin karaan ururradaasi. Adiga ayaa xulaano ururka ku wanaagsan xaaladdaada.

Dadka aljeriyiinta oo raba in ay dib u noqdaan waxay garab gal lacag ah oo dheereed ah ka helayaan nidaamka-REAN Ku Garab Gelista ka Haajirka iyo ka Noqoshada Nederland(REAN -regeling Return and Emigration Assistance from the Netherlands). REAN waxaad ka heli kartaa la talin, tikidh duullimaad iyo caawinaad sida aad dokumenti safar u heli lahayd. IOM Ururka Caalamiga ee Hijrada (International Organization for Migration) waxaa uu mas'uul ka yahay fulinta brograamka-REAN. Xitaa ururro kale wax ka caawina dib u noqoshada waa ay kuu codsan karaan garab galkaasi dheeraadka ah. Si aad nidaamkaasi u adeegsato waa in dhowr [shuruud ah](#) ka soo baxdaa. Weydii hagahaada in adiga aad adeegsan karto magdhowgaasi dheeraadka ah.

Hey'adahee dib u noqoshada caawinaad ka bixiya?

[Welke organisaties kunnen je helpen bij terugkeer?]

- **Hey'adda U Adeegta Qaxaatiga** (VluchtelingenWerk Nederland) iyaga oo ka amba qaadaayo [brojektiga Macal Madax Taag 2](#) ayeey wadahal kaala gelaayaan maxay yihiin fursadahaada dib u noqosho iyo dib- ula qabsasho ee waddanka aad ka timid. Nafsaddeenna ma sameyno hagista dib ugu noqoshada Aljeriya, balse waxaan karnaa in aan kula xiriirno ururro kale.
- **IOM**, Ururka Caalamiga ee Hijrada (International Organization for Migration), waxa ay kuugu caawini karaan keddib dib u noqoshaada in aad nolasha gurigaada dib ula qabsato. Dadka aljeriyiinta oo raba in ay dib u noqdaan waxay garab gal lacag ah oo dheereed ah ka helayaan nidaamka-REAN Ku Garab Gelista ka Haajirka iyo ka Noqoshada Nederland(REAN

-regeling Return and Emigration Assistance from the Netherlands). REAN waxaad ka heli kartaa la talin, tikidh duullimaad iyo caawinaad sida aad dokumenti safar u heli lahayd. Wax kasta waxay ku dhacayaan la shaqeynta xafiiska-IOM eek u yaal waddanka aad ka timid.

- [Mu'assasada Shaqowacan \(Goedwerk Foundation\)](#) waxa ay kuu soo bandhigeysaa xalal ku beegan xaaladdaada shaqsiga ah ee dib u noqosho. Aqoon yahannada qibradda leh, caawinayaasha iyo tababarayaasha ee Mu'assasada Shaqowacan (Goedwerk Foundation) waxa ay kugula hadlaayaan afafka ingriiska, fransiiska, isbaaniya, carabiga, amxaarka, tigrinyaha, farsiga, bashtuuga ama daariga. Waxa ay si taxadder leh kula diyaar gareynaayaan dib u noqoshada iyaga oo tusaale ahaan kugu garab gelaaya helista dokumentiga, booqashada safaaradda, caawinadda caafimaad, la xiriirka xubnaha qooyaska, iayagoo kula sameynayo qorshe maalgelin ee kharashka dib ula qabsashada. Waxa kaloo xitaa u macquul ah in ay kula garab galaan safarka aad ku aadeeyso waddanka aad ka timid. Mu'assasada Shaqowacan (Goedwerk Foundation) waxa ay qibrad ballaran u leedahay dib ugu noqoshada Aljeriya waxa ayna ku leedahay halkaa shax ballaaran oo dad dib u noqday iyo dad lala xiriiro.

Lammaanahee wada shaqeyn ayaa ku sugan waddanka aad ka timid?

[Welke organisaties zijn er in jouw land van herkomst?]

Hey'adda u Adeegta Qaxootiga (VluchtelingenWerk) kuma laha urur lammane u ah Aljeriya. Urruro kale ayaa mararka qaar ku leh halkaasi urur lammane u ah oo adiga kugu hagi karaayo dib u noqoshaadaada. Warbixin dheeraad ah kala xiriir urruradaasi ama taasi weydii hagahaada Hey'adda u Adeegta Qaxootiga (VluchtelingenWerk).